

TALLAALKA RSV



Beenaynta Quraafaadka



Tallaallada fayruska RSV waxaa loogu talagalay qaangaarka waayeelka ah keligood.

Tallaallada fayruska RSV waxay badbaado ama difaac ka bixiyaan cudurka daran ee neefsashada ee ka yimaadda fayruska unugyada badan ee neefsashada (respiratory syncytial virus) (RSV).

Tallaallada fayruska RSV waxaa loogu talinayaa dhammaan dadka qaangaarka ah ee 75 jir ah ama ka weyn iyo dadka qaangaarka ah ee 60-74 jir ah ee halis dheeraad ah ugu jira iyagoo qaba xaalado caafimaad oo gaar ah.

Inkastoo fayruska RSV uu saamayn karo shakhsiyaadka da' walba ah, haddana waxuu halis si gaar ah u badan geliyaa sabiyada iyo qaangaarka waayeelka ah.




Waxaa jira tallaalka RSV ee hooyo oo loogu talinayo dadka uurka leh ee u dhexeeya 32-36 toddobaad oo uur la sido si ilmahooda uurka ku jira looga badbaadiyo cudurka xun ee neefsashada.

Sawir ama iskaani si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan fayruska RSV iyo tallaallada diyaarka ah!



Caafimaadkaaga Badbaadi!

XAQIIQO MUHIIM AH OO KU
SAABSAN TALLAALLADA
IFILADA, COVID-19 IYO RSV



Immunization Action
Coalition of Washington



Macluumaad laga soo qaatay barta immunize.org, xarunta
CDC: cdc.gov/vaccines/, iyo Waaxda Caafimaadka
(Department of Health) ee gobolka WA: doh.wa.gov

TALLAALKA IFILADA (HARGABKA)



Tallaalka ifilada ama hargabku waa tallaalka sanad walba la bixiyo oo loogu talinayo qof walboo lix bilood jira ama ka weyn. Tallaalku waxay badbaado muhiim ah ka bixisaa cudurka ifilada iyo dhibaatooyinka ka iman kara.

Beenaynta Quraafaadka



Tallaalka ifilada ayaan anigu ifilo ka qaaday.


Anigu ma garanayo cid ifilada ama hargabka qaadday markaa dhab ma aha.



Tallaalka ifilada kama qaadi kartid ifilo. Waxaa ku jira fayrus la demiyey (la dilay) ama waxaa loo isticmaalaa farsamada dib isugu darista (recombinant technology), taasoo aanan dhalin karin cudurka.

Xarunta CDC waxay soo sheegtay in ugu yaraan 35 milyan oo qof ay qaadeen ifilada, 400,000 oo qof isbitaal la jiifiyey, ayna 25,000 oo qof ku dhinteen xilligii 2023-2024.

TALLAALKA COVID-19



Tallaalka cudurka COVID-19 ee xilliga 2024-2025 ayaa loogu talinayaa qof walboo lix bilood jira ama ka weyn.

Tallaalka COVID-19 waxuu dadka ka badbaadiyaa cudurka daran, isbitaal jiifinta, iyo dhimashada.

Beenaynta Quraafaadka



Waxaad cudurka COVID-19 ka qaadi kartaa tallaalka lagu siiyo.

Marba haddii aad hore u qaadday cudurka COVID, uma baahnid tallaalka.

Soo saarista tallaalka waa la deddejiyey, markaa waa halis.



Tallaallada KUMA jiro fayruska SARS-CoV-2. Tallaallada mRNA waxay unugyada aadamaha ka caawiyaan in ay soo saaraan borotiin dhaliya jawaabcelinta difaaca dabiiciga ah oo borotiinka qabta (spike protein) laftigiisu waxyeello ma leh mana dhalin karo cudurka COVID-19.

Suurogal ma aha in dib loo qaado caabuqa COVID-19! Waxaad heli kartaa qiyaasta tallaalka ee ugu dambaysay 2-3 bilood ka dib marka ay calaamadaha cudurku bilaabmaan haddii aadan hore u helin tallaalka xilliga la joogo.

Tallaalka waxaa la soo mariyey tijaabooyin caafimaadeed oo ballaaran oo waqti buuxa, baaritaanno, iyo dabagal badbaado. Hay'ado federaal oo badan ayaa soo wada shaqeeyey si ay u hubiyaan in tallaallada cudurka COVID-19 ay nabad qabaan oo ay waxtar leeyihiin.